Public Health
Seattle & King County

Heer Sare Ku Haynta Gobolka King: 2021-2022 Mudnaanta Siyaasadda La-Dagaalanka Midabtakoorka

Qaarkood waxay ugu yeeraan COVID-19 "Soojiraha Weyn" ama "Simaha Weyn". Si kastaba ha ahatee, Cudurka faafa ee COVID-19 ma uusan dheelitirin helitaanka caddaaladda ee ilaha loo baahan yahay. Waxey muujisay, xitaa intaa ka sii badan, inta uu la'eg yahay farqiga u dhexeeya dadka sida ay caddaalad ah u helaan ilaha loo baahan yahay ee kuwa heysta iyo kuwa aan haysan. Sidoo kale ma aysan u soo bandhigin wax cusub oo xogta ee, sayniska, taageerayaasha, Dadka Madoow iyo Dadka Asalka ah oo aan horey noo tusin qarniyaal. Xogta, sheekooyinka, iyo waayaha nololeed waxay u baahan yihiin isbeddel dhab ah.

Khudbadiisii uu ka jeediyey Degamada bishii Luulyo 24, 2020, Maamulaha Degmada King, Dow Constantine, wuxuu kaga hadlay "xaqiiqada naxariis darrada ah ee cunsuriyadda iyo [takoorka] bulshada oo dhan."

Dhimashada, caddaalad darada, iyo xasillooni darrada aan ku aragno gudaha iyo hareeraha waddanka sannadka 2020 waa natiijada tooska ah ee diidmada ah in la joojiyo nidaamyada, dhaqamada, iyo siyaasadaha ay dhisteen kuna sii nagaadeen sarraynta caddaanka. Halkaas kuma sii nagaadi karno.

Guusheena oo la wadaago gobolka oo dhan waxay ku xirantahay in lala xisaabtamo siyaabaha dadka Madoow iyo kuwa asaliga ah ay cadaalad darada naxdinta leh u saameysay cunsuriyada darteed. La'aanta kheyraadkka cadaalad iyo cadaalad darida ayaa dhamaanteen nawada saameysay iyada oo wadada loo gagol xaarayo awooda degmadeena si aan u abuurno bulshooyin aamin ah, caafimaad qaba, rajo leh, oo faraxsan.

Mudnaanta Qorshaha Siyaasadda La-Dagaalanka Midabtakoorka:

Bishii Juun 2020, Maamulaha Degmada King, Dow Constantine, iyo Agaasimaha Caafimaadka Dadweynaha - Seattle & King County, Patty Hayes, ayaa sheegay in Cunsuriyaddu ay ku tahay Dhibaato Caafimaadka Dadweynaha ah. King County iyo Caafimaadka Dadweynaha waxay u heellan yahiin qorshe caddaalad ku dhisan si loo xaliyo dhibaatadan muddada dheer.

Waxaan horay u sii wadi doonaa caddaaladda jinsiyadda, caddaaladda dhaqaalaha, iyo masuuliyadda nidaamka dowladda. Ajandaha siyaasadeed ee cusub ee 2021-2022 (Websaydhku wuxuu ku baxaa Ingiriis keliya). Dawlada Deegaanka King waxay si ula kac ah u dhagaysanaysaa una qiraysaa waaya-aragnimada maalinlaha ah ee Dadka Madow iyo kuwa Dhaladka ah ee inta badan ay saameeysay cunsuriyada qaabdhismeedka iyo cadaalad darada dhaqaale.

Xafiiska Fulintu wuxuu diiradda saarayaa dhinacyada siyaasadda ee hoos ku xusan si loo hagaajiyo awoodda, maalka iyo ladnaanta dadka oo dhan, iyadoo aan loo eegin jinsiyadooda, meesha ay ku nool yihiin, shaqadooda, ama xaddiga maaliyadeed. Isbedeladaan ku yimid nidaamka iyo maalgashiga bulshada waxay diirada saarayaan cadaalada bulshada, midabka, iyo dhaqaalaha.

Waxay xaqiijineysaa in kheyraadka loo wadaagi doono si cadaalad ah si loo daboolo baahida sii socota ee dadka sida cadaalad darada ah loogu saameeyay Degmada King, iyadoo diirada la saarayo dadka Madoow iyo kuwa Asaliga ah ee beesheena.

- Nidaamka Sharciga Dambiyada
- Horumarinta Dhaqaalaha
- Caafimaadka Bulshada, Caafimaadka Dhaqanka & Guriyeynta
- Kaabayaasha dhaqaalaha iyo deegaanka
- Hawlgallada Gudaha ee Degmada King

Qaab-dhismeedka siyaasaddu wuxuu diiradda saarayaa isbeddelada heer degmo, iyo sidoo kale talooyinka taageerada iyo iskaashiga ee isbeddelada heerka Magaalada, Gobolka, iyo Federaalka. Soojeedimahan fulineed waxaa la soo saaray iyadoo lagu saleynayo codsiyada, baahiyaha degdegga ah, iyo ahmiyadaha gaarka ah ee ay soo gudbiyeen dowladda hoose, ururada, iyo bulshada.

Siyaasadda 2021-2022 iyo soo jeedinta miisaaniyadda waxaa ka mid ah keyd gaar oo muddo dheer joogto ah loogu beddelayo habraacyada degmada si loo muujiyo in aan ka soo horjeedno qiyamkeenna ka dhanka ah cunsuriyadda. Ujeeddada ajandaha siyaasadeed iyo qorsheynta miisaaniyadeed waa in la daboolo baahiyaha, lana dabaqo isbeddelada wanaagsan ee loogu talagalay Dadka Madow iyo Dadka Dhaladka ah, Carruurta, iyo Qoysaska ku nool Degmadda King.

Xafiiska Fulinta ee King County iyo Caafimaadka Dadweynaha - Seattle & King County waxay sii wadayaan in ay kula shaqeeyaan waxayna isku halleyn doonaan xalalka ay hogaaminayaan bulshada inta aan sameyneyno isbadaladan lama huraanka ah. In ka badan wareegyada miisaaniyada iyo siyaasadaha, dadaalladaani waxay ka ilaalinayaan dhaqaajinta ilaha nidaamka iyo adeegyada kaliya ee ka jawaabaya natiijooyinka, ka hortagga ku saleysan bulshada ee ka shaqeeya in ay meesha ka saaran waxa sababaha asaasiga ah la joojiyo sii socoshada dhibaatooyinka iyo waxyeelada.

Xoojinta iyo taageerida dadaallada ku saleysan bulshada waxay ka hortageysaa baahida loo qabo ka-qaybgalka nidaamka sharciga, gacan ka geysashada dib-u-dhiska kalsoonida, iyo dhiirigelinta wanaagga bulshada. Isbeddelka fekerka leh, muddada-dheer ee si caddaalad ah loogu qaybiyo ilaha loo baahan yahay wuxuu abuuri doonaa caafimaad, farxad, rajo, nabadgelyo, iyo bulsho horumar leh oo lagu hagaajiyo caddaaladda iyo caddaaladda midab ee dhammaan dadka ku nool King County.

Xog dheeraad ah:

• Ahmiyadaha siyaasadeed ee Cunsuriyeeynta King County (Websaydhku wuxuu ku qoran yahay Ingiriis keliya)

• Ahmiyadaha siyaasadeed ee Cunsuriyeeynta ee u doodista iyo iskaashiga (Websaydhku wuxuu ku qoran yahay Ingiriis keliya)

• Ku hogaaminta Cadaalada Jinsiyada ee Degmada King